# Su'aalaha badanaa la isweydiiyo (FAQs)
# Barnaamijka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta

1. **Yaa loogu Talagalay Barnaamijka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta (CEN, Children's Extraordinary Needs)?**

Barnaamijka waxaa loogu talagalay carruurta ka yar 18 jir. Waxaa waajib ah inay qabaan baahiyo taageero oo sarreeya oo caafimaad ama habdhaqan marka lagu saleeyo Qiimaynta Baahiyaha Oregon.

2. **Immisa carruur ah ayaa iska diiwaangalin kara Barnaamijka CEN?**

Wax aan ka badnayn 155 carruur ah ayaa ku jiri kara barnaamijka markiiba. Marka carruurtu ka tagaan barnaamijka, sida hadday ka guuraan gobolka, qaar cusub ayaa lagu baddali doonaa booska ay banneeyaan.

3. **Waa maxay doorka ilmaha ee doorashada ka qayb qaadashada Barnaamijka CEN?**

Waalidku wuxuu xaq u leeyahay inuu doorto bixiyayaasha mushaariga ah ee ilmihiisa. Isku-duwaha adeegga ilmaha (SC) ayaa ilmaha u sharrixi doonaa ikhtiyaarada. Wuxuu ku dari doonaa waxa ilmuhu rabo muddada lagu jiro qorshaynta adeegga

4. **Waa maxay faraqa u dhexeeya waalid iyo bixiye mushaari ah?**

Waxaa jira faraqyo muhiim ah oo u dhexeeya waalidka oo ah mid aan lacag qaadan iyo bixiyaha Medicaid oo mushaar qaata. Hal farqi ayaa ah bixiyayaasha mushaariga ah ay yihiin tabiyeyaasha waajibku ka saaran

yahay soo sheegida gaboodfalka 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii. Haddaad tahay tabiye waajib saaran yahay, waa inaad soo tabiso dhammaan wixii gaboodfal ama dayac ah ee aad ka shakido. **Wac khadka tooska ah ee gaboodfalka 855-503-SAFE (7233) si aad u soo sheegto. Khadka tooska ah waa shaqeeyaa 24 saacadood maalintii, 365 maalmood sanadkii.**

### 5. Waa maxay wakiil idman?

Wakiillka idman wuxuu gacan ka gaystaa qorshaynta adeegga ilmaha marka uusan jirin waalid kale oo aan lacag qaadan oo doorkan ciyaaraa.

### 6. Immisa saacadood ayuu waalidku ka shaqayn karaa barnaamijka CEN?

Ilmuhu marnaba ma heli karo daryeel mushaar lagu qaato muddo ka badan 20 saacadood toddobaadkii kaasi oo uu bixiyo waalid daryeel-bixiye ah. Waxba kuma jabna in wax ka badan hal waalid ay noqdaan daryeel-bixiyaha ilmahooda, laakiin iyadoon la eegin tirada waalidiinta ee bixiya daryeelka lacagta lagu qaato, mushaar laguma siin karo wax ka badan 20 saacadood toddobaadkii guud ahaan.

### 7. Sidee ayuu waalidku isku diiwaangalin karaa si uu ugu shaqeeyo wakaaladda daryeel-bixinta?

Isku-duwayaasha adeegyada ayaa ka caawin doona waalidiinta inay heelaan wakaaladaha daryeelka bixiya — goob aad ugu shaqayn karto waalid mushaarle ah ahaan — kuwaasi oo horay u sheegay inay danaynayaan in ay shaqaalaysiiyaan waalidiinta carruurta leh.

Wakaaladaha daryeelka bixiya ee kale ayaa laga yaabaa inay jecel yihiin inay shaqaalaysiiyaan waalidiinta carruurta leh. Waalidiintu xor ayay u yihiin inay weydiiyaan wakaaladda ay doortaan. Waalidiinta waxaa waajib ku ah inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha wakaaladda daryeelka bixisa si loo shaqaalaysiiyo. Liiska wakaaladaha daryeelka bixiya ee ku xiiso gelin kara waxaa laga heli karaa halkan.

### 8. Waa maxay hawlaha waalidka daryeel-bixiye ah uu u qabto ilmihiisa marka uu yahay shaqaalaha wakaaladda daryeelka bixisa?

Daryeelka kalkaaliyaha. Adeeggan wuxuu ka caawiyaa dadka qabta hawlaha loogu talagalay nolosha maalinlaha ah (ADL, activities of daily living), hawlaha muhiimka ah ee nolosha maalinlaha ah (IADL, instrumental activities of daily living), iyo daryeelka caafimaadka la xiriira isagoo u qabanaya kaalmo gacan ku hayn leh, kormeerka, ama adeegsiga ereyo ama tilmaamo gacameed. Hawlaha loogu talagalay nolosha maalinlaha ah (ADLs) waxaa ka mid ah is-daryeella sida wax cunida, isticmaalka musqusha, isqurxinta, labbisashada, iyo maydashada. Hawlaha muhiimka ah ee nolosha maalinlaha ah (IADLs) waa waxyaalaha sida dukaamaysiga iyo cunto karinta.

Wakaaladaha daryeelka bixiya ma oggolaan karaan hawlaha qaar ee laga yaabo inay u muuqdaan inay yihiin ADLs iyo IADLs. Waalidiinta daryeel-bixiyayaasha ah lacag laguma siin karo inay hawlahaasi qabtaan. Kuwani waxaa ka mid ah mas'uuliyadaha iyo adeegyada waalidnimo ee guud ee laga heli karo goobaha kale sida dugsiga ama xafiiska dhakhtarka. Tusaalaha hawlaha aan lacagta lgu bixinin waxaa ka mid ah inaad baabuur

u kaxaysato aadista iyo ka imaanshaha dugsiga ama ballamaha dhakhtarka. Waalidiintu waa inay raacaan xeerarka wakaaladda ee lacagta siisa. Wakaaladaha bixiya daryeelka waxaa waajib ku ah inay u sharraxaan xeerarka waalidiinta mushaariga ah. Waalidiinta lacagta qaata waxaa waajib ah inay ka hawlgalaan gaarista yoolasha Qorshaha Taageerada Shaqsiyeed (Individual Support Plan (ISP) ee ilmaha. Waalidku waa inuu raaco xeerarka shaqo-bixihiisa waana inuu weydiiyo kormeerihiisa haddii uusan garanayn waxa ay tahay inuu sameeyo.

## 9. Muxuu waalidka daryeel-bixiyaha ah sameeyaa hadduu khalad ka jiro wakhtiga shaqo?

Waalidka daryeel-bixiyaha ah waa inuu u sheego wakaaladdiisa daryeelka bixisa sida ugu dhakhsaha badan si khaladka loo saxo. Arrintani waa muhiim, sababtoo ah khaladaadka biilasha waxaa loo tixgelin karaa xatooyo Medicaid, xitaa haddii aan loo kasin.

## 10. Miyaa waalidka lacag ama mushaar lagu siin karaa inuu bilmihiisa gaadiid-raac u helo haddii ay la xiriirto qorshaha taageerada habdhaqanka ee togan?

Maya.